

Tallaalka cudurka [Covid-19] looga hortago

Cudurka [Covid-19] waa cudur lays qaadsiiyo. Tallaalka waa habka ugu waxtar leh ee looga hortago in qofku u hab halis ah ugu xannuunsado ama u dhinto dartiisa. Tallaalka wuxuu kaloo kaalin ka geysta hoos u dhigida heerka faafinta cudurka [Covid-19] ee bulshada. Sidaas awgeed, ayay aad muhim u tahay in tiro badan ay cudurka iska tallaalaan.

Maaddada tallaalka waa dawo sugan oona laysaga tallaalo cudurka [Covid-19], waana maaddo hab taxadarsan loo soo tijaabiyay.

Tallaalka cudurka [Covid-19] looga hortago waa lacag la'aan. Sida badbaado aan qabyo ahayn cudurka [Covid-19] looga helo awgeed waa in qofka laba mar cudurka laga tallaala. Labada goor waxaa u dhaxayso muddo ka kooban 7 toddobaad.

Goorma is tallaali karaa?

Dhammaan dadka 18 sano jira ama da'dooda ka wayn, waxay helayaan fursadda tallaalka. Ma ahan arrin jinsiyadda dalka Iswiidan ku xiran. Xitaa dadka kumeelgaar ahaan dalka ku nool, magangelyo-dooneyaasha ama aan sharci dalka ku lahayn waxaa la siiyaa fursadda tallaalka oo lacga la'aan ah.

Waxaa lagula talinayaa inaad cudurka iska tallaalsho, xitaa haddii berri hore u cudurka [Covid-19] kugu dhacay.

Sida loo kala da'wayn yahay ayaa dadka loo kala mudnaan siiyaa. Sababto ah da'da wayn waxay kordhisa in qofku u hab halis u cudurka [Covid-19] ugu xannuunsado. Barta internetka 1177.se/vasterbotten/other-languages waxaad ka aqrisan kartaa warbixin ku saabsan kooxaha imminka la tallaalay.

Sidatan ayaa tallaalka loo ballansada

Waxaad iska tallaali kartaa xarumaha daryeel-caafimaadeedka ee ku yaalaan Gobolka Västerbotten ama xarumaha tallaalka ee ku yaalaan degmada Umeå. Degmooyinka qaarkood waxaad xitaa iska tallaali kartaa shirkadda Vaccina. Waa shirkad dadka ka tallaalsho cudurka [Covid-19] looga hortago ee u adeegsaday maamulka Region Västerbotten.

Labada jeer waxaa laga tallaali doonaa isla xarumaha daryeel-caafimaadeedka ama goobaha tallaalka. Ballanka tallaalka ee ugu horeeyo waa inaad adiga qabsato. Saacadaha firaqada ee la heli karo waa hadba maaddada dawada tallaalka ee yaalaan Region Västerbotten toddobaad kasta ayaa maaddada tallaalka loo keenaa. Tallaalka ugu horeeyo kaddib waxaa lagu qaaban doonaa goorta tallaalka labaad lagu tallaalo doono, kaasoo ku beegan 7 toddobaad kaddib. Ballanka tallaalka labaad waxaa ku qaaban doonaan shaqaalaha caafimaadka kaddib markii tallaalka koowaad lagugu tallaalo. Suurtagal ma noqon karto inaad xulato goorta tallaalka labaad lagu tallaali doono. Haddii ku suurtagalayn in lagu tallaalo tallaalka labaad 7 toddobaad kaddib, waa inaad tallaalka koowaad awgiis ballan kale oo goor kale ku beegan qabsato.

Waxaad tallaalka ballansan kartaa adigoo guda-gala 1177.se aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan, barta internetka ee Vaccinas ama adigoo khadka taleefanka kula xiriira xarumaha daryeel-caafimaadeedka. Haddii aynan ku suurtagalay-

nayn inaad baraha internetka ka ballan-qabsato ama waxaad khadka taleefanka kula xiriiri kartaa ama booqan kartaa xarumaha daryeel-caafimaadeedka sidii aad ballan ku qabsato awgeed.

Ballan-qabsasho darteeda khadka taleefanka kula ma xiriiri kartid barta internetka 1177.

Haddii aadan lahayn Tobbanka lambar aqoonsiga dalka Iswiidan

Waad is tallaali kartaa xitaa haddii aadan lahayn Tobbanka lambar aqoonsiga dalka Iswiidan. Waxaad tallaalka ka ballansan kartaa adigoo booqdo xarumaha daryeel-caafimaadeedka. La kaalay wixii aqoonsi ah ee aad haysato, sida kaararka loo yaqaanno [LMA-kort] ama [EU-kort]. Sidoo kale la kaalay haddii aad haysato lambarka loo yaqaanno [samordningsnummer]. Goorta aad kumeelgaar ahaan booqanasyo waxaa xarumaha daryeel-caafimaadeedka laga siinayaa lambar kumeelgaar ah, waa inaad lambarkaas haysato ilaa marka labaad laga tallaalo. Haddii aad haysato lambarka loo yaqaanno [reservnummer] kaasoo berri laga siiyay xarumaha daryeel-caafimaadeedka mar aad la xiriirtay, kaas ayaa isticmaali kartaa. Waa lambar laga adeegsan karo oo keliya goobaha daryeel-caafimaadeedka, hay'adaha kale ma raad-raaci karaan mana adeegsan karaan.

Baraha internetka ka qabso ballamada

Kaddib markii aad guda-gasho barta internetka 1177.se warbixinta af-iswiidish ayay ku qoran tahay. Haddii aadan af-iswiidish aqrin karin, qof qaraabo ah ayaa ka codsan kartaa in ballanka u baraha internetka kaaqa qabto. Waxaad kaloo khadka taleefanka kula xiriiri kartaa xarumaha daryeel-caafimaadeedka ballan-qabsashada awgeed.

Sidatan ayaa barta internetka 1177.se ballan looga qabsada:

1. Booqo bogga vaccinationsbokning.regionvasterbotten.se (af-iswiidish ayay ku qoran tahay). Halkaas waxaa kaaga muuqan doono saacadaha la ballansan karo ee dhammaan xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo goobaha tallaalka.
2. Xarun ama goob kasta oo layska tallaalo oo laga helo saacado la ballansan karo, waxaa ku qoran taariikhda la ballansan karo iyo tirada saacadaha. Tirada saacadaha la ballansan karo waxaa ku calaamadaysan midabka cagaarka.
3. Adeegso isku-xireha "Boka tid för vaccination mot covid-19" ee xarumaha daryeel-caafimaadeedka ama goobaha tallaalka ee aad xulatay.
4. Ku guda-gal aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan.

5. Ka jawaab su'aallaha foomka ku qoran. Su'allaha af-isiwii-dish ayay ku qoran yihiin.

6. Xulo "Covid-19-vaccination dos 1".

7. Xulo saacad firaqo ah kaddib ballanso.

Haddii barta internetka 1177.se aad ka guda-gasho ballan ka ma qabsan kartid Vaccina. Bogga vaccinationsbokning.region-vasterbotten.se waxaa laga aqrisan karaa warbixin ku saabsan goobaha kale Vaccina ku yaalaan. Isla goobtaas waxaa laga hela isku-xireyaasha ballan-qabsashada.

Ballan-qabso adigoo khadka taleefanka kula xiriiri xarumaha daryeel-aaafimaadeedka

Waxaad ballan-qabsn kartaa adigoo khadka taleefanka kula xiriiri xarumaha daryeel-caafimaadeedka. Rugta daryeel-caafimaadeedka aad caadi ahaan boqato ka sokow, waxaad tallaalka ka ballansan kartaa xarun kale. Xarumaha daryeel-caafimaadeedka waxay kaloo ka caawini karaan ballan-qabsashada goobaha tallaalka dhexe. Ballan-qabsasho awgeed khadka taleefanka kula ma xiriiri kartid 1177.

Markii aad khadka taleefanka kula xiriirto waxaad ku hadli kartaa af-isiwii-dish ama af-ingriisi. Haddii luqadahaas aadan ku hadlin ka codso qof aad garanayso in u ballan-qabsashada ka caawinno.

Shaqaalaha xarumaha daryeel-caafimaadeedka kama caawini karaan ballan ka qabsashada Vaccina.

Qabsashada ballan cusub ama ciribtirida ballamada

Waxaa muhim ah inaad ka soo habsaamin ballamada sababto ah dartaada ayaa maalintaas tallaalka lagu xafiday maadaama aad ballansatay.

Laakinse haddii aad dareento calaamadaha cudurka, kuwaa-soo tilmaami karaan cudurka [Covid-19] xaaladdaas ha is-tallaalin. Xaaladdaas waa inaad ciribtiro ballanka oo laga qaado shaybaar. Warbixin ku saabsan sida shaybaarka cudurka [Covid-19] layasaga qaado ka aqriso barta internetka 1177.se. Ballamada waxaa lagu ciribtira isla sida aad u qabsatay. Ogeysiis in xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo goobaha tallaalka, aynan badnayn fursadaha gooraha ballamada tallaalka labaad.

Ballan-qabsasho darteeda khadka taleefanka kula ma xiriiri kartid barta internetka 1177.

Haddii aad ka baaqato booqashada aad ballansatay ama kala soo habsaantay ciribtiridiisa

Haddii aad ka baaqato booqashada aad ballansatay waa inaad bixiso kharash. Sidoo kale haddii ciribtirada ballanka la soo habsaanto saacada aan ka badnayn 24 saacado booqashada kahor. Kharashka waa 250 kr.

Is-tallaalista kahor ka feker

- La kaalay dokumentiyadaha lagugu aqoonsado iyo foomka xaalad-caafimaadeedka [hälsodeklaration] oo buuxsan. Isku-xireha caddaynta xaalad-caafimaadeedka oo ku qoran afkaaga hooyo waxaad ka aqrisan kartaa 1177.se/en/xxx. Waxaad buuxin kartaa goorta goobta tallaalka aad ku sugan tahay.

- Soo gasho/labbiisoo dhar kalkaalisada caafimaadka u sahlin doonto in cududa/gacanta ka durto, sida tusaale funaanad ama shaati gacmo-gaab leh. Haddii aad dareemayso calaamadaha cudurka [Covid-19] ha booqan goobaha tallaalka. Xaaladdaas ballan kale oo cusub qabso.

- Sida ciriiriga looga hortago awgiis iska xaadiri goobta toban daqiiqo kahor ballanka. Markii aad sugayso in lagu yeero ha iloowin xajinta kala fogaanshada u qofka kale ku jiro.

- Shaqaalaha aad la kulmi doonto waxay ku hadlaan af-isiwii-dish iyo af-ingriisi. Iska tallaalka xarumaha daryeel-caafimaadeedka laga heli karo fursadda qof turjubaan ah. Haddii aad turjubaan u baahan tahay waa inaad shaqaalaha wargelisaa markii tallaalka aad ballansanayso.

- Dhammaan shaqaalaha caafimaadka waxay xajiyaan sirta xirfadada. Taasoo macneheedu ay tahay in qof aan shaqo ku lahayn la wargelin karin xogta daryeelkaaga iyo daawayntaada xiriir la leh. Sharciga qof kasta ayuu khuseeyaa iyadoo fiirogaar aan la siinin jinsiyada isiwiidishka iyo in kale.

- Markii goobaha aad u socoto iyo aad ka soo laabanayso waa inaad isticmaasho maskaro tayadiisa sugan. Sidoo kale haddii qof u ku wehlin doono waa in u isticmaalo maskaro.

Haddii lagamaarmaan ay tahay oo keliya soo wado qof qaraabo ah.

Tallaalka kaddib

Maalinta/habeenka tallaalka kaddib ee ugu horeeysa waxaa dhici karto in cududa/gacanta aad xannuun ka dareento, madax-xannuun iyo daal badan. Waxaad dareemi kartaa qarqarayo, qandho ama in kalagoosyada iyo murqaha ku xannuunaan. Dhibaatooyinka noocaas ah waa kuwa fudud oo dhawr maalmood kaddib iskooda u ciribtirma. Waa inaad gurigaaga iska joogto xilliga caalamadaha aad dareemayso. Haddii hal maalin kaddib aynan calaamadaha iskooda u ciribtirmin waa in shaybaar laga qaada. Sababto waxaa la raba in la habsado in usan cudurka [Covid-19] kugu dhicin, sida tusaale waxaa dhici karto in cudurka lagu qaadiyay tallaalka kahor.

Sida hoos loogu dhigo heerka faafinta cudurka [Covid-19] awgiis sii wad tixgelinta talo-siinta

Waa inaad tixgeliso talo-siinta hay'adaha xitaa kaddib markii lagu tallaalay.

Badbaado aan qabyo ahayn oo heer sare ah waxaad heleysaa kaddib markii laba toddobaad ay ka soo wareegato tan iyo markii tallaalka labaad lagu tallaalay. Waxaa dhici karto in cudurka u kugu dhaco inkastoo lagu tallaalay.

Sidoo kale waxaa dhici karto inaad fayruuska faafiso inkastoo usan cudurka kugu dhicin, sida tusaale haddii gacmahaaga ay gaareen.

Macluumaad ku saabsan muddada waxtarka tallaalka lama haayo.

Khadka taleefanka oo luqado badan

Wixii su'aallo guud oo ku saabsan cudurka [Covid-19] iyo tallaalka waxaad kala xiriiri kartaa khadka 08-123 680 00. Luqadaha lagugu caawini karo waxaa kamid ah: af-amhar, af-carabi, af-bosni, af-kroati, af-dari, af-ingriisi, af-persi, af-rush, af-serbo, af-soomaali, af-isbaanish ama af-tigrigna. Khadka wuxuu furan yahay isniin-jimce, saacadaha 9 ilaa 15.

Se lediga tider och boka direkt på
1177.se/vasterbotten/om-vaccin-covid-19
(sida på svenska)



Warbixin dheeraad ku saabsan tallaalka cudurka [Covid-19] looga hortago waxaad ka aqrisan kartaa

lakemedelsverket.se/en/this-is-what-applies-to-corona-vaccine (af-ingriisi ayay warbixinta ku qoran tahay)